Xeerarka Amaahda iyo amaahda maktabadda

Ku soo dhowow maktabadaha degmada Eslöv. Si aad u amaahato waxaad u baahan tahay kaarka amaahda. waxaad ku helaysaa Adiga oo :

1. iska diiwaangeli websaydhka maktabadda, adiga adeegsanayo bibliotek.eslov.se
2. tusi kaarka aqoonsigaaga iyo kusoo qaado kaarka amaahda mid ka mid ah maktabadahayna.

Haddii aad wax caawimaad ah uga baahan tahay xagga diiwaangelinta, waxaad la xiriiri kartaa shaqaalaha maktabadda.

Marka aad is qoreyso, waxaad ballanqaadaa in aad raacdo xeerarka amaahda ee hadda u yaalla maktabadda. Xeerarka amaahda waa is beddeli karta. Sidaas awgeed waxa muhiim ah in aad la socotaa xeerarka ku khuseeya.

Haddii aad rabto inaad wax amaahato iyadoo aan kaarka amaahda lagaa helin macluumaadka, waa in aad tustaa caddeyn aqoonsi ah. Sidoo kale, waxa aad ka amaahan kartaa makiinadaha (Automat-ka ah) adiga oo gelinaayo lambarkaaga (lambarka ee caddaysa dhalashada qofka) iyo lambarkaaga PIN (lambar ee sirta ah).

Adiga ayaa ka mas'uul ah waxa aad amaahato.

Kaarka amaahdu waa dukumenti shaqsiyeed oo qiima leh, adiga ayaa ka mas'uul ah waxkasta oo kaarkaaga lagu amaahdo. Sidaa darteed, ha bixin marnaba kaarkaaga amaahda ama lambarka sirta ah ee PIN ee aad dooratay. Haddii aad weydo ama kaa lumo kaargaaga amaahda, waa in aad sida ugu dhaqsiyaha badan uguna macquulsan ku wargelisaa maktabadda.

Caruurta iyo dhalinyarada dadooda ka yar tahay 18 sano waxa ay u baahan yihiin saxiixa waalidka ama qofka mas'uulka ka ah si ay u helaan kaarka amaahda. Waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ayaa xil ka saaran yahay kaararka amaahda ee carruurta iyo wax kasta oo kaarka lagu amaahdo - xitaa haddii qof kale adeegsado. Adiga oo jira da'da 18 sano waa inaad ballanqaadaa inaad raacdo qaanuunka amaahda dadka waaweyn ee hadda u yaal maktabadda.

Waqtiyada amaahda ee Warbaahinta kala duwan

Caadi ahaan, Waqtiga amaahda waa 28 maalmood. Xilliga xagaaga, muddada amaahda waa la kordhin karaa, marka laga reebo warbaahinada loo keydiyey amaah-qaataha kale.

Waqtiyada kale ee amaahdu waxay noqon karaan tusaale ahaan filimada, joornaalada

(wergeysyada toddobaadlaha ama biloodlaha ah oo aan badanaaba qorin akhbaaraha) iyo ciyaarta fiidiyaha.

Adiga ayaa ka mas'uul ah amaahdaada ilaa laga soo celiyo oo laguna soo celiyo waqtigoodii wax kastoo la amaahdo.

Xadka da'da filimka iyo ciyaaraha fiidiyaha

Xadka da'da ee lagu amaahdo filimaanta waa 18 sano, waxaana loogu talagalay ciyaaraha fiidiyaha 16 iyo 18 sano. Waa in aad tustaa aqoonsi ansax ah si aad u amaahato cayaaraha fiidiyowga, waxaadna amaahan kartaa ugu badnaan laba ciyaar markiiba.

Amaahdaada

Waxa aad hubin kartaa oo aad maamuli kartaa amaahdaada adiga oo o ku galaya bogga internetka ee maktabadda ama adeegsanaya kaarkaaga amaahda ama lambarka shaqisyada iyo lambarka sirta PIN. Sidoo kale, halkaas waxa aad ku kordhisan kartaa amaahdaada - haddii uusan jirin amaah-qaate kale oo safka ku jira. Waxa aad amaahan kartaa warbaahinada illaa laba jeer. Waxa kale , oo aad weydisan kartaa shaqaalaha maktabadda caawinaad lagu hubinayo amaahdaada.

Kaydka

Waxa aad geli karta websaydhka maktabadda si aad u keydisato warbaahinta aad rabto inaad amaahato. Waxaa lagugu soo wargeli doonaa marka aad heli karto waxyaabaha aad rabtay in aad qaadato.

Amaahyada isdhaafsiga ah – walax maktabad kale laga soo amaahday

Amaahada isdhaafsiga ah waa warbaahinada laga dalbaday maktabad ka baxsan degmada Eslöv. Qiimaha amaahdas waa 10 karoon. Haddii aadan ka noqonin dalabka ama lagaahelin amaahda, waxa aad bixi doontaa 25 karoon. Wax kasta oo aad amaahda isdhaafsiga ah ku amaahatay haddii aad ka soo daahdu dib u soo celinta, waxaa lagugu kordhin doonaa 10 kr/ maalintii.

Waa shuruucda amaahda maktabadaha ee amaahda isdhaafisiga ah, waqtiga amaahda iyo suurtagalnimada dib u amaahsashada. Haddii aad rabto Isdhaafsiga amaahda, waa in aad la xiriirtaa shaqsi ka mid ah maktabadahayada degmada Eslöv.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida amaahda isdhaafsiga ah loo adeegsado waxa aad laga heli karaa bibliotek.eslov.se.

Soo celinta warbaahinta

Waxa aad ku soo gudbin kartaa warbaahinta amaahda aaladda (Automat) maktabadda ka dibna waxa aad helaysaa risiid caddeynayaa in aad dib u soo celisay. Waxa aad ku soo celin kartaa warbaahinta dhammaan maktabadaha dadweynaha ee Skåne. Shaqaalaha maktabada ayaa waliba diyaar ku ah in ay ka caawiyaan dib usoo celinta.

Marka aad tahay amaah-qaate, waxa aad mas'uul ka tahay in aad soo celiso warbaahinta amaahda si la mid ah sida markii aad amaahatay oo kale.

Amaahda daahitaanka

Haddii aad dib u soo celiso amaahdaada goor dambe, waxa aad bixin doontaa lacagta khidmada daahida. Waxaa ka reebban warbaahinta caruurta loogu talagalay. Khidmada daahitaanka amaahda caadiga ahaan waa 2 karoon / maalintii.

Haddii aadan ku soo gudbinin amaahdaada waqtigeeda, waxaad heli doontaa xasuusin. Haddii amaahda intaas ka dib aan la soo celin, waxaan kuu soo diri doonaa biil. Fursadaada aad wax badan ku amaahan karto ayaa si otomaatig ah loo xirayaa haddii khidmadda daahitaanka ay tahay 100 karoon ama in ka badan.

Warbaahinta lumay ayaa la gudaya iyadoo la raacayo liiska qiimaha maktabadda.

Khidmadaha:

Khidmadaha hada – Waxa aad eegtaa https://bibliotek.eslov.se/web/arena. Khidmadaha waxaa go'aannada ka gaaraya guddiga dhaqanka iyo xilliga firaaqaha.